

# Waxaad ka soo warbixisay dembi... **markaa maxaa xiga ee dhacaya?**

Waxuu buugyarahani kuu sheegayaa waxa aad ka filan karto Nidaamka Caddaaladda Dembiyeed (Criminal Justice System), waxuuna sharxayaa:

- waxa iminka dhacaya
- sida aad u heli karto talobixin iyo taageero
- xuquuqdaada
- halka aad warbixin dheeraad ah ka heli karto.

Waxay booliisku warbixin kugu saabsan u gudbin doonaan hay'adda Taageerada Dhibbanaha (Victim Support) si ay kuugu deeqi karaan gargaar iyo taageero – haddii aadan booliiska ka codsanin in aanay sidaas samaynin.

Si aad warbixin dheeraad ah uga hesho wax kastoo buugyarahan ku jira, tag halkan **[www.cjsonline.gov.uk](http://www.cjsonline.gov.uk)**

# You've reported a crime... **so what happens next?**

This booklet tells you what you can expect from the Criminal Justice System, and explains:

- what happens now
- how to get advice and support
- your rights
- where you can find more information.

The police will pass information about you to Victim Support so that they can offer you help and support – unless you ask the police not to.

For more information about anything in this leaflet, go to **[www.cjsonline.gov.uk](http://www.cjsonline.gov.uk)**

## Qoraalladaada gaarka ah iyo macluumaadka xiriirka

Waxaa laga yaabaa in ay waxtar kuu yeelato in aad qorato macluumaadka qof kastoo aad la xiriirto muddada dacwaddaada la baarayo. Waxaad sidaas meel keliya ugu haysanaysaa dhammaan macluumaadka xiriirka iyo warbixinta muhiimka ah.

### Xiriirka ugu horreeya ee aad booliiska la yeelato

Magaca sarkaalka:

Lambarka telefoonka ee saldhigga booliiska:

### Sarkaalka wax ka qabanaya dacwaddaada (haddii uu ka duwan yahay midka kore)

Magaca sarkaalka:

Lambarka telefoonka ee sarkaalka:

### Macluumaadka dacwadda dembiga

Lambarka tixraaca ee dacwadda dembiga:

Lambarka telefoonka ee miiska dembiga:

### Qoraallada kale

## Your own notes and contact details

You may find it useful to note down the details of any people you come into contact with when your case is being investigated. This way you have all the contact details and important information in one place.

### Initial contact with the police

Name of officer:

Phone number of police station:

### Officer dealing with the case (if different from above)

Name of officer:

Phone number of officer:

### Crime case details

Crime case reference number:

Phone number of crime desk:

### Other notes

**Waxaannu ka xun nahay in uu dembi kugu dhacay. Waxaannu garanaynaa in laga yaabo in ay taasi kuu ahayd dhacdo saxariir badan, ama in aad dareensan tahay caro ama wareer.**

Waxaannu kaaga mahadnaqaynaa in aad dhacdada ka soo warbixisay. Go'aanka la xiriiridda booliisku waxuu noqon karaa mid walwal iyo walaac laga dareemo, waxaana laga yaabaa in aad ka walwalsan tahay ama ka walaacsan tahay dhibaatooyinka taas ka iman kara. Haddii aad talobixin ama taageero rabto, waxaa jira dad badan oo ku caawin kara.

Waxuu buugyarahani kuu sharxayaa waxa imnka dhici doona iyo waxa aad ka filan karto **Nidaamka Caddaaladda Dembiyeed**. Waxaa weliba ku jirta warbixin ku saabsan ururrada aad la xiriiri karto si aad talobixin bilaash ah uga hesho – haddii aad u baahan tahay warbixin camali ah ama taageero shucuureed.

**Nidaamka Caddaaladda Dembiyeed** waxuu ka mid yahay adeegyada dawladda ee dalka ugu waaweyn. Waxuu ka kooban yahay hay'adaha ay ka mid yihiin booliiska, Adeegga Ciqaabmarinta ee Boqortooyada (Crown Prosecution Service), maxkamadaha, xabsiyada iyo carbinta (probation), kuwaasoo dhammaantood ka wadashaqaynaya in caddaaladda dembiyeed ay ka fuliyeen England iyo Wales.

**We are sorry to hear that you experienced a crime. We understand that this might have been a distressing experience, or that you might feel angry or frustrated.**

We appreciate that you reported the incident. The decision to contact the police can be stressful, and you might be worried or concerned about its implications. If you would like advice or support, there are many people who can help.

This leaflet explains what will happen now and what you can expect from the **Criminal Justice System**. It also contains information about organisations that you can contact for free advice – whether it's for practical information or emotional support.

The **Criminal Justice System** is one of the biggest public services in the country. It is made up of agencies such as the police, the Crown Prosecution Service, courts, prisons and probation, all working together to deliver criminal justice in England and Wales.

# Maxaa iminka dhacaya?

## Waxa ay booliisku samayn doonaan

Marka aad dembi ka soo warbixiso, waxay booliisku kuu sheegi doonaan waxa xiga ee dhacaya.

- Waxay ku ogaysiin doonaan haddii dembiga la sii baarayo iyo haddii kale. Haddii baaritaanka la joojiyo, waxay kuu sheegi doonaan sababaha taas ka dambeeya.
- Haddii dacwaddaada la sii baaro, waxay booliisku warbixin kaa siin doonaan horusocodkeeda. Waxaad xaq u leedahay in lagula socodsiiyo halka ay dacwaddaadu marayso, markaa qofka ka mid ah booliiska ee aad la xiriirto weydiiso in uu wararka cusub kuu soo diro.

### Waxan ayaad samayn kartaa si aad booliiska u caawiso

Marka aad dembi ka soo warbixiso, waxaa jira waxyaabo aad samayn karto si aad gargaar uga bixiso baaritaanka:

- Booliiska u sheeg haddii aad wax kale ka xasuusato dembiga ka dib marka aad bayaankaaga bixiso.
- Booliiska islamarkaaba ogaysii haddii aad beddesho macluumaadkaaga xiriirka – sida lambarkaaga telefoonka ama cinwaanka gurigaaga.
- Booliiska u sheeg haddii dembigu uu ka koobnaa xadgudub, ama haddii aad u aragto in uu la xiriirsanaa jinsiyadda, galmada, diinta, naafonimada ama aqoonsiga jinsiga.
- Booliiska ogaysii haddii aad qabto baahiyo gaar ah – matalan, haddii aad qabto baahiyo gaar ah oo la xiriira dhaqdhaqaaqa, wadaxiriirka ama diinta.

# What happens now?

## What the police will do

When you have reported a crime, the police will let you know what happens next.

- They will inform you whether or not the crime is being investigated further. If the investigation is closed, they will give you the reasons why.
- If your case is investigated further, the police will give you information about its progress. You have a right to be kept informed about your case, so do ask your police contact for updates.

### This is what you can do to help the police

When you report a crime, there are a few things you can do to help with the investigation:

- Tell the police if you remember anything more about the offence after you made your statement.
- Alert the police straight away if you change your contact details – like your phone number or home address.
- Tell the police if the crime involved abuse, or if you think it was related to race, sexuality, religion, disability or gender identity.
- Let the police know if you have any specific needs – for example, if you have special mobility, communication or religious requirements.

## Kaa ilaalinta kadeedista

Haddii siba lagu kadeedo ama laguugu hanjabo muddada baaritaan ama maxkamad lagu jiro, waa in aad islamarkaaba booliiska la xiriirto. Waa gef dembiyeed in la cabsigeliyo qof kastoo booliiska ka caawinaya baaritaan.

Haddii dembiilaha la soo qabto, la hayo, lagu sii daayo damiinasho ama dembiga lagu xukumo, maxkamadda dembiyada ayaa soo saari karta amar xannibid si qofkaas loogu diido in uu mar kale agtaada yimaaddo, kuu hanjabo ama ku cabsigeliyo.

## Haddii dacwaddaada maxkamadda la geeyo

Haddii qof la xiro oo dembiga lagu eedeeyo, **Adeegga Ciqaabmarinta ee Boqortooyada (Crown Prosecution Service)** (CPS) ayaa ka go'aan gaari doona haddii maxkamadda la soo marin doono dacwaddaada.

Haddii dacwaddaada maxkamadda la geeyo, **Cuntubka Daryeelka Markhaatida** ayaa kula soo xiriiri doona ka hor inta aanan maxkamadda la bilaabin. Waxay taas ka dib kuu ahaan doonaan barfa keliya ee aad xiriir la yeelanayso, waxayna warbixin iyo taageero kuugu deeqi doonaan inta maxkamadda lagu jiro.

Markhaatida qaarkood ee dareema cabsi ama nugayl, maadaama ay matalan da' yar yihiin ama naafaysan yihiin, waxay u baahan karaan gargaar laga siiyo markhaati furidda. Mararkaas, waxay markhaatidu xaq u yeelan karaan 'tallaabooyin gaar ah'. Waxaa kuwaas ka mid noqon karta in daah ama wax kaloo u dhigma la dhex dhigo miiska markhaatida iyo eedaynaha ama in ay markhaati furaan iyagoo uu caawinayo xirfadle takhasus leh.

## Protecting you against harassment

If you are harassed or threatened in any way during an investigation or a trial, you should contact the police immediately. It is a criminal offence to intimidate anyone helping the police in an investigation.

If the offender has been caught, remanded in custody, released on bail or convicted, the criminal court can make a restraining order to stop them coming near you, threatening you or intimidating you again.

## If your case goes to court

If someone is arrested and charged, the **Crown Prosecution Service** (CPS) will decide whether to prosecute and take your case to court.

If your case goes to court, you will be contacted before the trial by the **Witness Care Unit**. They will be your single point of contact from then on, and will inform and support you at court.

Some witnesses who feel intimidated or vulnerable, because they are young or disabled for example, may need help giving evidence. In these cases, witnesses may be entitled to 'special measures'. This could involve placing a screen between the witness box and the defendant or giving evidence with the help of a specialist.

**Adeegga Ciqaabmarinta ee Boqortooyadu** waxuu ka masuul yahay maxkamad geynta dacwadaha dembiyeed ee ay booliisku soo baareen.

**Cuntubka Daryeelka Markhaatida (Witness Care Unit)** ayaa daryeela dhibbaneyaasha iyo markhaatida laga bilaabo marka qof lagu soo eedeyo dembiga ilaa dhammaadka dacwadda. Waxay markhaatida ka wargeliyaan horusocodka dacwaddooda, waxay wax kaste u diyaariyaan markhaatida tagaya maxkamadda, waxayna ku deeqaan taageero.

## Wax ka soo ogow hawsha maxkamadda

Si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan:

- ▶ Sida loo gaaro go'aanka ciqaabmarinta, tag qaybta 'Your CPS' (CPS-kaaga) ee **[www.cps.gov.uk](http://www.cps.gov.uk)**

Ama dalbo buugyaraha la yiraahdo *The decision to prosecute* (Go'aanka ciqaabmarinta) adigoo soo wacaya **020 7796 8442**

- ▶ Waxa ka dhacaya maxkamadda, internetka ka fiirso fiidiyowga la yiraahdo 'Going to court' (Tegidda maxkamadda) halkan **[www.moj.coionline.tv/videos/goingtocourtvideo](http://www.moj.coionline.tv/videos/goingtocourtvideo)**

Ama tag halkan **[www.cjonline.gov.uk/victim](http://www.cjonline.gov.uk/victim)** si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo guud

The **Crown Prosecution Service** is responsible for prosecuting criminal cases that have been investigated by the police.

The **Witness Care Unit** takes care of victims and witnesses from the point when someone is charged with the crime to the end of the case. They inform witnesses about the progress of their case, make any arrangements for witnesses going to court, and offer support.

## Find out about the court process

For more information about:

- ▶ How the decision to prosecute is made, go to the 'Your CPS' section at **[www.cps.gov.uk](http://www.cps.gov.uk)**

Or order the leaflet *The decision to prosecute* by calling **020 7796 8442**

- ▶ What happens at court, watch the 'Going to court' video online at **[www.moj.coionline.tv/videos/goingtocourtvideo](http://www.moj.coionline.tv/videos/goingtocourtvideo)**

Or go to **[www.cjonline.gov.uk/victim](http://www.cjonline.gov.uk/victim)** for more general information

## Sida aad u heli karto talobixin iyo taageero

Marka uu dembi kugu dhaco, waxaa jira sababo farabadan oo aad u rabi karto talobixin ama taageero. Hase yeeshee su'aalaha ama walwalka aad qabto si kastoo ay u weyn yihiin ama u yar yihiin, waxaa jira ururro ku caawin kara.

### Ururrada talobixinta iyo taageerada

#### Taageerada Dhibbanaha (Victim Support)

Haddii aad dhibbane u noqotay dembi, waxaa laga yaabaa in aad u baahato gargaar camali ah iyo warbixin ku saabsan matalan, beddelidda ama dib u hagaajinta hanti (sida beddelidda qufulka) ama dalbashada magdhaw.

Hay'adda Taageerada Dhibbanuhu waa hay'ad samafal ah oo qaran, oo madaxbannaan taasoo mutaddawiciinteedu ay ku caawin karaan. Adeegyadoodu waa bilaash, waa sir waxaana heli kara qofwalba, iyadoon la eegayn goorta ay dhacdadu timid.

Waxaa laga yaabaa in ay waxtar kuu yeelato in aad la hadasho mid ka mid ah mutaddawiciintooda haddii aad saxariir kala kulantay dhacdada. Haddii aad u baahan tahay talobixin ama taageero sii takhasus badan, waxay weliba awoodi karaan in ay kuu gudbiyaan urur iyaga kaaga sii habboon.

#### Telefoonka:

**0845 30 30 900**

Waxay khadadku furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha 9ka subaxnimo ilaa 9ka habeenimo, Sabtida ilaa Axadda 9ka subaxnimo ilaa 7da fiidnimo, Maalmaha Fasaxa ah 9ka subaxnimo ilaa 5ta galabnimo

#### Ama:

**0207 268 0200**

Wixii khuseeya arrimaha ilaalinta macluumaadka

#### Bogga internetka:

**[www.victimsupport.org.uk](http://www.victimsupport.org.uk)**

## How to get advice and support

When you have experienced a crime, there may be many reasons why you would like advice or support. However big or small your questions or worries are, there are organisations that can help.

### Advice and support organisations

#### Victim Support

If you have been a victim of crime, you may need practical help and information about, for example, replacing or repairing property (such as changing locks) or claiming compensation.

Victim Support is a national, independent charity whose trained volunteers can help you. Their services are free, confidential and available to everyone, regardless of when the event happened.

You might find it helpful to talk to one of their volunteers if you found the experience distressing. If you need more specialised advice or support, they will also be able to refer you to a more suitable organisation.

#### Phone:

**0845 30 30 900**

Lines open Mon to Fri 9am to 9pm, Sat to Sun 9am to 7pm,  
Bank Holidays 9am to 5pm

#### Or:

**0207 268 0200**

For data protection issues

#### Website:

**[www.victimsupport.org.uk](http://www.victimsupport.org.uk)**

## **Talosiinta Muwaadiniinta (Citizens Advice)**

Haddii uu dembi kugu dhacay, waxaa laga yaabaa in ay kugu wajahan yihiin dhibaatooyin maaliyadeed ama aad u badhato talobixin maaliyadeed dembigaas awgiis. Waxaad weliba qabi kartaa su'aalo ku saabsan arrimaha sharciyeed ama dhibaatooyin kaloo camali ah.

Xafiisyada Talosiinta Muwaadiniinta (Citizens Advice Bureaux) ee qaranka isugu xiran ayaa kaa caawin kara in aad kuwaas xalliso iyagoo warbiixn iyo talobixin bilaash ah kuugu deeqaya.

### **Telefoonka:**

Tag bogga internetka si aad u hesho lambarka telefoonka ee xafiiska xaafaddaada

### **Bogga internetka:**

[www.citizensadvice.org.uk](http://www.citizensadvice.org.uk)

## **UK Online (Ingiriiska Internetka gudihiisa)**

Waxaa jira warbixin iyo talobixin farabadan oo ku diyaar ah internetka haddii uu dembi kugu dhacay. Haddii aadan lahayn meel aad internetka ka isticmaali karto, hay'adda UK Online ayaa kaa caawin karta in aad internet bilaash ah ama qiime jaban ka isticmaasho mid ka mid ah xarumhooda xaafadeed. Waxay leeyihiin in ka badan 6,000 oo xarumood – si bilaash ah u soo wac iyaga si aad u ogaato midda kuugu dhow.

### **Telefoonka:**

**0800 771 234**

### **Bogga internetka:**

[www.ukonlinecentres.com](http://www.ukonlinecentres.com)

## **Citizens Advice**

If you have experienced a crime, you may be facing financial problems or need financial advice as a result. You may also have questions about legal issues or other practical problems.

The national network of Citizens Advice Bureaux can help you resolve these by giving you free information and advice.

### **Phone:**

Go to the website to find the phone number of your local bureau

### **Website:**

[www.citizensadvice.org.uk](http://www.citizensadvice.org.uk)

## **UK Online**

There is a lot of practical information and advice available online if you have experienced a crime. If you don't have access to the internet, UK Online can help you find free or low-cost internet access at one of their local centres. They have over 6,000 centres – call them free to find your nearest one.

### **Phone:**

**0800 771 234**

### **Website:**

[www.ukonlinecentres.com](http://www.ukonlinecentres.com)

# Xuquuqdaada

## **Xeerka Habdhaqanka ee Dhibbaneyaasha (Victims' Code of Practice)**

Xeerka Habdhaqanka ee loogu talagalay Dhibbaneyaasha Dembiyadu waxuu qeexayaa adeegyada aad ka filan karto hay'adaha caddaaladda dembiyeed – sida booliiska iyo maxkamadaha – marka aad dembi ka soo warbixiso. Waxuu Xeerku hubinayaa, matalan, in lagula socodsiiyo horusocodka dacwaddaada. Haddii aad tahay dhibbane nuglan ama cabsi qaba, waxuu weliba hubinayaa in lagu siiyo tixgelin gaar ah.

Haddii aadan ku faraxsanayn adeegga aad hesho, waxaad samayn kartaa cabasho sida uu Xeerku dhigayo.

- ▶ Si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Xeerka Habdhaqanka ee loogu talagalay Dhibbaneyaasha Dembiyada ama si aad cabasho u samayso, tag halkan [www.cjonline.gov.uk/victim](http://www.cjonline.gov.uk/victim) riixna qaybta 'Your rights' (Xuquuqdaada) ee dhinaca midig ku qoran.

## **Sida aad magdhaw u doonan karto**

### **Dhaawaca, khasaaraha ama waxyeellada**

Haddii dembigu uu kuu geystay dhaawac, khasaare ama waxyeello, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhaw haddii qof la soo qabto oo dembiga lagu xukumo. Waxaad u baahan doontaa in aad booliiska u sheegto haddii aad rabto in aad magdhaw doonato, si adeegga CPS uu u dalban karo amar magdhaw. Waxaad weliba u baahan doontaa in aad booliiska siiso macluumaadka saxda ah ee ku saabsan khasaaraha, dhaawaca ama waxyeellada, iyo (haddii ay suurogal tahay) wixii caddayn ah, sida rasiidyada.

# Your rights

## **The Victims' Code of Practice**

The Code of Practice for Victims of Crime sets out what services you can expect from the criminal justice agencies – such as the police and the courts – when you have reported a crime. The Code ensures, for example, that you are kept up to date on the progress of your case. If you are a vulnerable or intimidated victim, it also makes sure that you are given special consideration.

If you are not happy with the service you receive, you can make a complaint under the Code.

- ▶ For more information about the Code of Practice for Victims of Crime or to make a complaint, go to [www.cjonline.gov.uk/victim](http://www.cjonline.gov.uk/victim) and click on 'Your rights' in the right-hand panel.

## **How you can seek compensation**

### **Injury, loss or damage**

If you have suffered any injury, loss or damage as a result of the offence, you may be entitled to compensation if someone is caught and convicted. You will need to tell the police if you want to seek compensation, so that the CPS can apply for a compensation order. You will also need to give the police accurate details of the loss, injury or damage, and (if possible) any evidence, like receipts.

## **Dhaawacyada ka yimaadda dembi rabshad leh**

Haddii uu dhaawac kaa soo gaaray dembi rabshad leh, waxaad magdhaw ku dalban kartaa Qorshaha Magdhawga Dhaawacyada Dembiyeed (Criminal Injuries Compensation Scheme). Si aad warbixin dheeraad ah uga hesho qorshahaas, booqo bogga internetka ee Masuuliyiinta Magdhawga Dhaawacyada Dembiyeed (Criminal Injuries Compensation Authority).

**Telefoonka:**  
**0800 358 3601**

**Bogga internetka:**  
**[www.cica.gov.uk](http://www.cica.gov.uk)**

## **Waxyellada ka timaadda darawal aanan caymis lahayn**

Haddii dembiiluhu uu waday gaari aanan caymis lahayn, waxaa laga yaabaa in aad magdhaw ka dalban karto Xafiiska Caymiyeyasha Baaburrada (Motor Insurers' Bureau) (MIB).

**Telefoonka:**  
**01908 830 001**

**Bogga internetka:**  
**[www.mib.org.uk](http://www.mib.org.uk)**

## **Injuries caused by a violent crime**

If you have been injured in a violent crime, you can seek compensation through the Criminal Injuries Compensation Scheme. For more information about this scheme, visit the Criminal Injuries Compensation Authority website.

**Phone:**  
**0800 358 3601**

**Website:**  
**[www.cica.gov.uk](http://www.cica.gov.uk)**

## **Damage caused by an uninsured driver**

If the offender was driving an uninsured vehicle, you may be able to claim compensation through the Motor Insurers' Bureau (MIB).

**Phone:**  
**01908 830 001**

**Website:**  
**[www.mib.org.uk](http://www.mib.org.uk)**

# Halka aad warbixin dheeraad ah ka heli karto

## Wax su'aalo ah?

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan warbixinta ku jirta buugyarahan ama haddii aad u baahan tahay gargaar si aad u hesho talobixinta iyo taageerada adiga kuu diyaar ah, fadlan la xiriir xoogga booliiska ee xaafaddaada. Waxaad macluumaadkooda xiriirka ka heli doontaa buuggaaga telefoonnada.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan hawsha caddaaladda dembiyeed iyo taageerada kuu diyaar ah waxaad weliba ka heli kartaa qaybta dhibbanaha ee [www.cjsonline.gov.uk](http://www.cjsonline.gov.uk)

## Farta Braille ee dadka indhaha la' iyo luqadaha kale

Waxaa buugyarahan lagu heli karaa farta Braille – iyo weliba dhowr luqadood oo kaladuwan.

- ▶ Haddii aad rabto in aad hesho mid ka mid ah nuskhadahaas kale, xoogga booliiska ee xaafaddaada weydiiso. Waxaad macluumaadkooda xiriirka ka heli doontaa buuggaaga telefoonnada.

## Caawinta ka hortagga dembiga

Yaraynta halista iyo cabsida ka jirta dembiyadu waa taxaddi u yaalla booliiska iyo bulshadu in ay wadajir u xalliyaan. Laakiin waxaa jira siyaabo farabadan oo aad isaga yarayn karto halista ah in aad dhibbane u noqoto dembi.

Buugyaraha la yiraahdo *Be safe, be secure: Your practical guide to crime prevention* (Nabad ku sugnow, amni ku sugnow: Hagahaaga camaliga ah ee ka hortagga dembiga) ayaa kuugu deeqaya talooyin ku saabsan sida aad u ilaalin karto qoyskaaga, gurigaaga iyo hantidaada.

- ▶ Si aad buugyaraha internetka uga fiiriso, tag halkan [www.crimereduction.homeoffice.gov.uk](http://www.crimereduction.homeoffice.gov.uk), ama xoogga booliiska ee xaafaddaada nuqul weydiiso. Waxaad macluumaadka xiriirka ee booliiska xaafaddaada ka heli doontaa buuggaaga telefoonnada.

# Where to find more information

## Any questions?

If you have any questions about the information in this leaflet or if you need help getting the advice and support available to you, contact your local police force. You will find their contact details in your phone directory.

You can also find more information about the criminal justice process and the support available in the victim section at [www.cjsonline.gov.uk](http://www.cjsonline.gov.uk)

## Braille and other languages

This leaflet is also available in Braille – as well as in a number of different languages.

- ▶ If you would like to get one of these alternative versions, ask your local police force. You will find their contact details in your phone directory.

## Help to prevent crime

Reducing the risk and fear of crime is a challenge for the police and the community to tackle together. But there are many ways that you can reduce the risk of becoming a victim of crime.

The leaflet *Be safe, be secure: Your practical guide to crime prevention* offers suggestions on how you can protect your family, your home and your belongings.

- ▶ To view the leaflet online, go to [www.crimereduction.homeoffice.gov.uk](http://www.crimereduction.homeoffice.gov.uk), or ask your local police force for a copy. You will find your local police contact details in your phone directory.



Criminal Justice System: working together for the public